

Mudanayaal iyo Marwooyin
Inna lillahi wa inaa ileyhi raajicuun

Allaha u naxariisto dhamaan shuhadadii ku geeriyootay dhacdadii kuliyadda Jaalle Siyaad 24 Luulyo 2023, gaar ahaan dhalinyaradii ka soojeeday gobolka Sh. Hoose, Allahana waxaan ugu baryeenaa ehelkoodii samir iyo iimaan.

Mudanayaal iyo marwooyin, Gollaha Hogaanka Sare ee Beesha Biimaal waxa uu soo saray war murtiyeed ka kooban 10 qodob oo la xiriira falkii waxashnimada ahaa ee ka dhacay Kuliyadda Jaale Siyaad. Qodobadaas oo kala ah:

1- Dhacdadii 24 Luulyo 2023 ee lala beegsaday askartii Guutada 14 Oktobar waxa ay a hayd mid xanuun badan, uur kutaalona leh. Gollaha Hogaanka beesha Biimaal-na waxa uu si adag u cambaareynayaa falkaasi, waxa uuna cararabka ku adkeenayaa in falkaasi ka horistaagi doonin dhalinyarada beelaha ka soo jeeda Sh. Hoose difaaca dalkooda iyo diintooda

2- Golaha Hogaanka Beesha Biimaal waxa uu u mahad celinayaa masuuliyiinta dowlada, gudoomiyaha golaha baarlamaanka, xubnaha golaha, warbaahinta xorta ah iyo shacabka soomaaliyeed sida ay uga falceliyeen falkii xasuuqa ahaa ee ka dhacay Kuliyadda Jaale siyaad.

3- Goluhu waxa ugu baaqayaa Madaxda dowlada in baaritaan dhab ah lagu sameeyo Falkii arxanka darnaa ee ka dhacay Xerada Jaalle Siyaad.

4- Sidoo kale waxa uu ugu baaqayaa siyaasiyiinta Beelaha Direed iyo kuwa kasoo jeeda Koonfur Galbeed in ay gacan buuxda siiyaan hay'addaha ku lugta leh baarintaankaas, ila markan korjoogteen iyo dabagal ku sameeyaan baaritaankaasi

5- Goluhu waxa uu dalbaneynaa in maxkamadda la soo taagaayo cid alla cidii lagu helo in ay ku lug lahayd falkaasi, ayna noqoto mid si calan ah(Public) loo tabiyo

6- Waxaan ku baaqeynaa in loo gurmado dhaawacyada yaala isbitaalka Erdogan iyo in si deg deg ah loogu qaado caafimaad dibada ah askarta dhaawacoodu culus yahay

7- Beesha Biimaal waxay kamid tahay beelaha sida xooga leh u taageeray dowladdhiska soomaaliya iyo Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, dhilyaro iyo odayaal badan ayaa naftooga ku waayay difaaca dowlad dhiska, ilaa haddana kuma haysto beesha xuquuqdii ay mudneyd. Sidaa daraadeed, Golaha waxa uu ka codsanayaa madaxda dowlada heer federaal iyo mid goboleedba in loo magacaabo Taliyaal iyo in la dalacsiiyo saraakiishooda.

8- In loo magacaabo Beesha Biimaal taliyaha sare ee Guutada 14 Oktobar Maadaama ay ka howlgasho Gobolka ay beesha degto

9- waxaan codsaneynaa in magdhow la siiyo dhamaan askartii ku geeriyootay falkii murugada lahaa ee lagu xasuuqay dhalinyaradii geesiyaasha ahaa

10- Golaha Hogaanka beesha Biimaal waxa uu cadeynayaa hadii talooyinkaasi iyo codsiyadaasi wax laga qabanwaayo uu ku baaqayo shirweyne looga tashanaayo Ayaaha beesha iyo ciidamadooda ku jira Dowladda soomaaliya.

WABILAHITOWFIIQ